



ISKA ILAALI TUUGADA TALAALKA COVID-19

Sida lagu oggaado inay tuugo yihiin:



Waxay kaa codsanayaan xogtaada gaarka ah iyo macluumaadka kaarka daynta.

Minnesota Department of Health (Waaxda Caafimaadka Minnesota) iyo adeeg bixiyaasha caafimaadku marna kulamasoo xariirayaan kumana waydiinayaan kaarkaaga daynta, koontada baanka, ama lambarka Social Security (Amniga Bulshada) si aad u hesho talaalka COVID-19.



Waxay kuusoo bandhigayaan inay kaa iibshaan talaalka.

Talaalku waa bilaash. Haddii aad hesho wicitaan ama iimeel qofku kaa iibinaaya talaal qiimo jaban, kaasi waa tuug. Talaalka bilaash ayuu ku helayaa qof kasta ayadoon laga eegayn inaad haysato caymis ama xaalada soo galootiga.



Waxay kuu sheegayaan inay kuu keenayaan talaalka.

Waxaad u baahan tahay inaad talaalka ka hesho xirfadle caafimaadka. Talaalka si toos ah laguuguma keeni karo.

Haddii aad isleedahay waxaa kusoo galay tuugo, ha u jawaabin.

Waxaad u gudbin kartaa cabashooyin ku saabsan tuugada Xaafiiska Garyaqaanka Guud ee Minnesota adoo adeegsanaaya Faylka Cabashada ee www.ag.state.mn.us/Office/Complaint.asp.

m MINNESOTA

STAY SAFE MN

Minnesota Department of Health | health.mn.gov | 651-201-5000 | 625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975
La xariir health.communications@state.mn.us si aad u codsato xogta oo qaab kale ah. | 02/12/2021 (Somali)